

Tilmaamaha gaashaamida

Dadka qaar waxay qabaan xaalad caafimaad qatar ah oo gaashaamida ayaa ah hab lagu ilaaliyo sababtoo ah waxay ku jiraan halis aad u sareeya inuu ku dhaco fayruska korona (COVID-19). Gaashaamida waxaa loola jeedaa yaraynta xiriirka dadka kale. Takhtarkaaga ayaa ku sheegi doono haddii aad tahay hal ka mid ah dadkaan u baahan gaashaamid. Laakiin laga bilaabo 1 Agoosto, gaashaamida waa laga joojiyay dadka badankooda. Qof wuxuu u baahan yahay inuu is-gaashaamo haddii uu qabo hal ama ka badan dhibaatooyinka caafimaad ee ku qoran liiska [halkaan](#).

Liiska kuma jiro cudurka waalida laakiin waxaa la ogaadey in dadka qaba cudurka waalida ay ku jiraan halis sare inuu ku dhaco fayruska. Sidaa awgeeda tilmaamoyinkaan gaashaamida ayaa caawinaad lahaan karo.

Haddii aad mar hore is-gaashamisay, waa inaad sii waddo inaad raacdo tilmaamoyinkaan:

- gacmahaada si joogto ah u dhaq 20 ilbiriqsi;
- dabool wajigaaga markaad joogto dukaan iyo meelo kale gudaha ah; iyo
- Samee masafo 2 mitir ah (6 fiit, oo ah cabbirka sariir wayn) adiga iyo dadka kale oo aan kula noolayn.

Maxaa dhixi doono hadda?

Adeegga Gaashaamida Qaranka wuxuu joojin doonaa inuu kuu keeno cuntada bilaashka ah, daawoyinka iyo daryeelka aasaasiga ah. Laakiin:

- Waxaad la hadli kartaa golahaada deegaanka si aad u ogaato haddii ay xaafaddaada ka jiraan qoloyin mutadaawac ah;
- rijeetoyinka daawada, alaabta lagama marmaanka ah iyo wixii cunto aad iibisito, waxaa guriga kugu keeni karo [NHS Volunteer Responders](#);
- waxaad suuq-weynaha ka heli kartaa mudnaanta adeegga cunto keenista (haddii aad horey isku diiwaangelisay cuntada bilaashka ah).

Maxaad samayn kartaa hadda?

Uma baahnid inaad raacdo talada gaashaamida sidaa awgeeda hadda waxaad:

- tegi kartaa shaqada haddii goobta shaqada yahay mid badbaado ka yahay cudurka Covid ([Covid-secure](#)), laakiin guriga ka sii shaqey markuu suurto gal kuu yahay;
- tegi kartaa dibedda inta aad jeceshahay, laakiin weli waa inaad isku daydo inaad yareyso xiriirka aad la leedahay dadka kale;
- u booqan kartaa suuq-waynaha, pub'ka ama dukaamada, adigoo sameynaayo masaafo 2 mitir ah (6 fiit, oo ah cabbirka sariir wayn) dadka kale markuu suurto gal yahay;
- si nadiif ah ku hayn kartaa sagxadaha badanaa la taabto ee gurigaaga iyo/ama shaqadaada.

Maxaa dhici doono markii faafida fayruska korona dib kor u kaco?

Waxaa lagaa codsan karaa inaad mar labaad is-gaashaamiso haddii xaaladda is-beddesho iyo kordho faafida fayruska korona bulshada dhaxdeeda.

Magacaada si ammaan ah ayaa lagu hayn doonaa liiska bukaanada gaashaaman ee NHS Digital. Warqad ayeey kuu soo qori doonaan haddii talada la beddelo.

Macluumaad ka faah-faahsan oo ku saabsan is-beddelada gaashaamida waxaad ka heli kartaa bogagga [talo-bixinta](#) dowladda

Macluumaad ka badan ee khuseeya fayruska korona fadlan talada dowladda ka eeg <https://www.gov.uk/coronavirus>